SOMALI

NHS
Greater Glasgow and Clyde

Macluumaad ku saabsan

Qaaxada Qarsoon

(Af-Soomaali)

Qaaxada Qarsoon (TB)

- Qaaxadu (TB) way ku nooshahay jirka, laakiin kuma korto
- Qofka ma dareensiiso xanuun, calaamadona ma keento
- Qof ilaa qof uma gudbin karto
- Waxay isu beddeli kartaa cudurka qaaxada

Cudurka Qaaxada (TB)

- Qaaxadu (TB) way firfircoon tahay oo waxay ku kortaa jirka
- Waxay qofka dareensiisaa xanuun waxayna keentaa calaamado
- Waxay u gudbi kartaa qof ilaa qof
- Waxay sababi kartaa dhimasho haddii aan la daaweyn

Waa maxay Qaaxada Qarsoon (TB)?

Qaaxada qarsoon (TB) waa marka jeermiska qaaxadu (TB) ku jiro jirkaaga, laakiin aadan qabin qaaxo (TB) firfircoon.

- Inkastoo jeermiska qaaxadu (TB) ku jiro jirkaaga, habdhiska difaaca jirkaaga ayaa xakameynaya.
- Ma yeelan doontid wax calaamado ah, mana dareemi doontid xanuun.
- Jeermiska qaaxada (TB) uma gudbin kartid qof kale.

Qaaxada qarsoon (TB) waxaa sidoo kale loo yaqaannaa caabuqa qaaxada (TB), qaaxada hurudda (TB) ama qaaxada (TB) aan firfircoonayn.

Sidee loo ogaadaa Qaaxada Qarsoon (TB)?

Waxaa jira baaritaanno kala duwan oo ay ka mid noqon karaan baaritaanka maqaarka ee tuberkuliinka iyo/ama baaritaanka dhiigga si loo xaqiijiyo Qaaxada Qarsoon (TB).

Maxaa loo daweeyaa Qaaxada Qarsoon (TB)?

- Qaaxada Qarsoon (TB) waxay u baahan tahay in la daweeyo si looga hortago inay mustaqbalka isu beddesho qaaxo firfircoon.
- Caadi ahaan, habdhiska difaaca jirku wuxuu baabi'iyaa jeermiska marka la neefsado. Hase yeeshee, haddii habdhiska difaaca jirku daciifo, waxaa laga yaabaa inuusan awoodin inuu jeermiska qaaxada (TB) xakameeyo. Tani waxay u oggolaanaysaa jeermiska qaaxada (TB) inuu firfircoonaado.

Waa maxay Daaweyntu?

Daaweynta qaaxada qarsoon (TB) badanaa waa laba antibiyootik oo la isku daray hal kiniin, kaas oo maalin kasta la qaato muddo 3 bilood ah.

Jeermiska qaaxada (TB) si aad u tartiib ah ayuu u dhintaa, sidaas darteed aad ayay muhiim u tahay in la dhammaystiro muddada daaweynta antibiyootigga oo dhan. Dhammaystir la'aanta muddada daaweyntu waxay mustaqbalka khatar kuugu keeni kartaa inaad qaaddo qaaxo firfircoon (TB).

Waxaad u baahan doontaa baaritaan dhiig si loo hubiyo in beerkaagu si caadi ah u shaqaynayo ka hor daaweynta iyo inta ay socoto.



Rifinah 150/100mg



Rifinah 300/150mg



Pyridoxine
Fiitamiin B6

Ma Jiraan Waxyeellooyin?

Inta aad qaadanayso antibiyootigga, waxaad dareemi kartaa in kaadidaada, saxaradaada, ilmadaada ama dhididkaagu yeeshaan midab casaan ama oranji ah. Tani waa saameyn aan waxyeello lahayn. Muraayadaha indhaha ee jilicsan ayaa midabkoodu isbeddeli karaa.

Antibiyootiggu wuxuu yarayn karaa waxtarka kiniinka ka hortagga uurka iyo hababka kale ee ka hortagga uurka. Tani waxay ka dhigan tahay inaad sidoo kale u baahan doonto inaad isticmaasho hab xannibaad la isku halleyn karo sida kondom.
Fadlan arrintan kala hadal rugta qorshaynta qoyska, dhakhtarka ama farmashiistaha.

Fadlan u sheeg Dhakhtarkaaga Guud (GP) haddii aad isku aragto:

- Lalabbo ama matag
- Cagaarshow (qaybta cad ee isha ama maqaarka oo huruud noqda)
- Finan ama cuncun joogto ah
- Qandho
- Faraha iyo suulasha oo kababyooda

Xusuusnow

- Waa inaad antibiyootigga qaadataa maalin kasta, 30 daqiiqo ka hor quraacda
- Ha seegin kiniinka
- Ka fogow khamriga
- Isku day inaad tagto dhammaan ballamaha rugaha caafimaadka

Ka fogow

Waa inaadan isticmaalin sariiraha qorraxda inta lagu jiro daawaynta tiibayda. Fadlan isticmaal kareemka cadceeda oo aad u sareeya marka maqaarkaagu uu soo gaadho iftiinka qoraxda. (Qaar ka mid ah kaniiniyada ka hortagga tiibishada ayaa maqaarkaaga ka dhigi kara mid u nugul fallaadhaha qorraxda.)

Macluumaad Dheeraad ah:

Haddii aad u baahan tahay macluumaad ama talo dheeraad ah, la xiriir Kalkaalisada Qaaxada (TB) ee deegaankaaga:

Glasgow Royal Infirmary

Glasgow iyo Clyde East iyo North
☎ **0141 201 3900**
Isniin - Khamiis 9am - 6pm (Jimce 4:30pm)

Gartnavel General Hospital

Glasgow iyo Clyde West
☎ **0141 232 2161**
Isniin - Arbaco 8am - 4pm

Queen Elizabeth University Hospital

Glasgow iyo Clyde South
☎ **0141 451 5862**
Isniin - Khamiis 8am - 4pm

New Victoria Hospital

Glasgow iyo Clyde South West
☎ **0141 345 8846**
Talaado - Jimce 9am - 4pm